



Dheeg iyo hashoodii maandeeq





Dheeg iyo hashoodii maandeeq

Buugga 7^{aad} | Fasalka 2^{aad}



Buuggan waxaa maalgaliyay hay'ada USAID Waxaana isla diyaariyay PACT ETHIOPIA iyo xafiiska waxabarashada DDSI. Waxaana dib u habayn iyo daabacaad ku sameeyay hay'ada Save the children iyo wasaarada wax barashada heer federal

2008 T.I.




The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>




Dheeg waa wiil arday ah oo dhigta fasalka labaad wuxuuna kamid ahaa ardayda anshaxa fiican ee aan waxbarashada ka soo dib dhicin.




Sidoo kale dheeg waxuu ka yimaadaa qoys reer guuraa ah oo dagan baadiyaha, wuxuuna ku dadaalaa shaqada guriga iyo tan dugsigaba.



Hadaba maalin maalmaha
ka mid ah ayuuka soo
dib dhacay dugsigii oo
uu yimid markii cashirkii
la dhigtay, kadib barihii
ayaa joojiyay albaabka



fasalka, oo waydiiyay
waxa uu ku soo dib
dhacay, dheeg ayaa
yidhi” macallin waxaa
jirta hal aan leenahay
oo la dhaho maandeeq
oon caanaheeda jeclahay,
aabahay ayaana gayn
jiray kaynta. Marka



saaka aabahay majoogin
marka maandeeq ayaan
kayntii geeyay oo saas
ayaan ku soo dib dhacay.
barihii ayaa yidhi dheeg
waa runtii sababtoo ah
waligii wax been ah noo
ma sheegin marka ha
soo galo fasalka

